



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maarso 24, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Tilmaamaha La raacayo ee COVID-19

Iyada oo dadka reer Oregon oo badani ay helayaan tallaalada, oo ay ku jiraan dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo daryeel bixiyayaashooda lacagta qaata iyo kuwa aan qaadan, ayay soo baxayaan su'aalo la xiriira tilmaamaha iyo siyaasadaha la raacayo ee ODDS.

ODDS waqtigan la joogo wax isbeddelo ah kuma sameysnayo tilmaamaha la raacayo ee loogu talagalay adeegyada guryaha la degan yahay, adeegyada guriga-dhexdiisa laga bixiyo ama shaqada/adeegyada taageerada hawlaha maalintii. Tilmaamaha la raacayo ee ODDS ee waqtigan la joogo waxay waafaqsan yihiin tilmaamaha la raacayo ee ka socda Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon. ODDS waxay sii wadaa in ay korka kala socoto tilmaamaha la raacayo ee qaranka iyo gobolka ee loogu talagalay COVID-19 iyo qiimeynta in isbedel loo baahan yahay iyo in kale .

Fadlan sii wada in aad la socoto wixii tilmaamo ah ee la raacayo ee ku jira tilmaamaha shaqaaluhu raacayo ee ODDS, kuwaasi oo la cusbooneysiyo marka kasta oo siyaasadaha la beddelo oo ay weheliso farriin.

Tilmaamaha shaqaaluhu raacayo waxay ku qoran yihiin [bogga internet-ka ee ODDS COVID](#) waxayna kala yihiin:

- [Buuga Shaqaalaha Maamulka Kiiska](#)
- [Buuga Ruqsad siinta Shaqaalaha](#)
- [Buuga Shaqaalaha Guryaha La Degan yahay ee 24 Saacadoodka ah](#)

- [Buuga Shaqada iyo shaqaalaha DSA](#)
- [Buuga Shaqaalaha Hay'adda Guriga-Dhexdiisa](#)
- [Buuga Shaqaalaha Nolosha La Taageero](#)

Waad ku mahadsan tahay dadaaladaada aad ku taageerayso dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow [website-keena](#).

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.